Förpacknings- och Tidningsinsamlingen waxay ku wargelinayaaan*

Somaliska

Fal wayn ayaa dhaco mar kasta oo aad baako iyo xaanshida-wargeysyada dib-u-warshadayn awgeed u xaraysid. Daboolkii quraradaha waxay noqdaan musmaaro. Baakadii oomada ku jiri jirtay waxay noqonaysa katoon qurux badan oo kabaha lagu keeno. Xaanshida-wargeysyada hore waxay noqonayasa mid cusub oo la akhrisan karo. Sidaas ayee kaalin wayn ugu geysan karta keydinta tamarta. Waxaad sidaaso kale ugu hortegaysa in abuurka u san ka lummin goobabinta dabiiciga. Kaalintaada waxaa aad ugu faa'iideysanaayo deegaanka. Adigu na wax un baad ka faa'iideysanaysa. Mar kasto oo aad khashinka dib-u-warshadayso.

Baakadaha iyo xaanshida-wargeysyada iyo goobabinta dabiiciga

Baakooyinka iyo xaanshida-wargeysyada oo idil, waa la soo uruuriya sidii dib loogu warshadayn laha awgood, oo baakooyinka ama soo saar cusub loogu dhigi laha awgood. Baakooyinka balaastikada waxaa tusaale ahaan laga sameeya, qalabka buuqa hoos u dhiga, buraashayada maacuunta lagu dhaqo, bacda raashinka lagu keydiyo iyo dheriga dhirta. Quraaradaha, xaanshiyadaha culus, iyo baakooyinka xaanshida ka samaysan waxaa badi ahaan laga sameeya baakooyin cudayb ah. Baakooyinka birta ka samaysan waxaa laga soo saari kara mariinka tareenada, birta baabuurada iwm. Xilhaynta xaanshida-wargeysyada waxay noqonayaan xaanshida-wargeysyo cusub oo la akhrisan karo!

Xilqaadka soo-saareyaasha

Dowladda waxay go'aamisay in shirkad kasta oo soo saarta, dalka soo gelisa, buuxisa ama iibisa baakooyinka ama badeecado baakoooyin ku jira, waxaa xil-saaran jiritaanka goobta uruurinta, goobtaaso macaamisha dib-u-warshadayn awgeed, baakooyinka dib ugu soo celin karaan. Go'aankaas wuxuu la magacbacxay xilkaska soo-saareha. Isla sidaas ayaa loola dhaqma xaanshida-wargeysyada iyo xaanshida dib loo soo celiyay. Shirkadaha soo saara ama soo geliya ama dalka keena xaanshida-wargeysyada iyo daabaco ama dalka keena xaanshida-wargeysyada, waxaa iyaga na xilsaaran saaran jiritaanka goobta aruurinta, iyo dib-u-warshadaynta xaanshida dib loo soo celiyay. Baakadaha iyo xaanshida-wargeysyada waa labada badeecooyin ee ugu horeeya oo loo yeelay xilkaska soo-saareha. Kuwaaso ah khashinka ugu badan, hab fudud na wax loogu qaban karo. Soo-saareyaasha baakooyinka iyo xaanshida dib loo soo celiyay way wadashaqeyaan, waxayna la magac baxeen FTI (Förpacknings- och Tidningsinsamlingen). Waa dhaqdhaqaaqid aanan ganacsi ku salaysnayn.

Goobaha dib-u-warshadaynta

FTI waxay maamulaan goobaha dib-u-warshadaynta, kuwaaso tiradooda garayso 5 800, kuna yaalaan dalko idil. Waa goobaha dib-u-warshadayn awgeed, la geeyo khashinka xaanshida-wargeysyada yo baakooyinka balaastikada, xaanshida, birta iyo qurraarada laga sameeyay. (Isla goobtaas waxaa laga heli kara weel loogu talagalay bateeriga iyo dharka duugga ah.)

fti FÖRPACKNINGS & TIDNINGS INSAMLINGEN

www.ftiab.se, tel 0200-88 03 11

* Ururiyaasha baakadaha iyo xaanshida-wargeysyada

Sidatan ayaa loo kala sooca

Baakooyinka oo idil waa in la faaruqiya oo la nadiifiya. Baakadaha kala duwan waa ln lakala sooca. Haddii taasi ay suurtagal noqon karin, u kala sooc baakooyinka hadba waxa ugu culus.

BAAKADAHA BALAASTIKADA KA SAMAYSAN

Baakadaha balaastikada culus

Tusaale: quraaradaha, kombooyinka, jingaanno iyo baaldiyada yaryar.

Baakadaha balaastikada fudfudud

Tusaale: bac, baakada nooca loo yaqaanno [refillpaket], tuubooyinka yaryar, bacda lagu keeno [chips], maadada loo yaqaanno [frigolit], bacda raashinka lagu keydiyo [plastfolie] iyo [film].

Sidatan yeel: Weelaha lagu ururiyo baakadaha balaastikada culus iyo fudud, waxaa laga hela dhamman goobaha dib-u-warshadaynta, laakinse ururinta laba siyabood kala duwan ayaa loogu dhaqaaqa. Ama waxaa laysugu geeya isla weel, taasoo badi ahaan dhacda. Ama kala weel ayaa lagu shuba, baakadaha balaastikada culus hal weel, baakadaha balaastikada fudud na weel kale. Habka degmadaada khashinka loo kala sooco, waxay ka muuqdaan weelasha lagu shubo. Sidaasoo kale weeyaan kuwa yaalaan agagaarka guryaha. Quraaradaha ku fur daboolka iyo wixii la mid ah. Bacda aad ku sido baakadaha balaastikada culus ku shub weelka, iyagoo haddana u ka yaala hab fudud, taasoo dib-u-warshadayntooda sahlineeyso.
Fiirogaar ah: waxyaalaha balaastikada ka samaysan (sida alaabta guriga, qalabyada carruurta ku ciyaaraan), oo baakooyin ahayn, waxaa lagu quba goobta loogu talagalay khashinka culus ama kan guriga. Quruuradaha balaastikada oo rahaamad awgeed dukaamada dib loogu celiyo, waa in dukaamad la geeya.

BAAKOOYINKA XAANSHIDA

Tusaale: baakada sonkorta, baakada baastada, xaanshida haddiyadaha, baakada caanaha iyo casiirka, kartoonka kabaha, xaanshida musqusha, galka cd-yaasha, buugagga iyo kuwa loo yaqaanno [wellpapplådor].

Sidatan yeel: Kala bixi, kadib isku keen. Baakooyinka yaryar dhexgeli kuwa waawayn.
Fiirogaar ah: Baqshadaha waxaa la dhex dhiga khashinka aqalka (ama qaybta la gubiyo karo, haddii kuwaasoo kale ay jiraan). Xaanshida-wargeysyada, kuwa xayeeysiinta iwm waxaa la dhexdhiga weelka xaanshida-wargeysyada loogu talagalay.

BAAKADAHA BIRTA

Tusaale: Qasacadaha raashinka, qasacadaha daawada naadafada ee la buufiya ku jiraan, tuubooyinka daawada cadayga ku jiraan, furarka quraaaradaha iyo dabooladooda, qasacadaha renjiga engegsan iyo waxyaalaha xaanshida aluuminyamka ka samaysan iwm.

Sidatan yeel: Qallooci furarka afka fiiqan leh ee qasacadaha raashinka ku jiraan. Daboolka tuubada ugxaanka kalluunka [kaviartuben] ha ka saarin.
Fiirogaar ah: Qasacadyadaha renjiga iyo xabbagta ku harsan waxaa loola dhaqma sida qashin halis ah. Qashinka birta, qashinka loo yaqaanno [VVS-detaljer], taawada wax lagu dubo iyo waxyaalaha kale oo ka reeban baakooyinka, waxaa lagu quba goobta loogu talagalay qashinka culus ama aqalka [grov- eller hushållsavfall]. Qasacadaha cabbitaanka waa in dukaamada loo celiya.

BAAKADAHA QURAARADA KA SAMAYSAN

Tusaale: quraaradaha iyo qasacadaha oo nooca midabaysan iyo kuwa aanan midabaysanayn.

Sidatan yeel: Ka saar noocyaha daboolada kala duwan, kadib kala soc dib-u-warshadaynta hadba nooca laga sameeyay.
Fiirogaar ah: 33 iyo 50 cl quraaradaha rahaamad awgeed dukaamada dib loogu celiyo. quraaradaha rahaamad awgeed dukaamada dib loogu celiyo waa in dukaamada dib loogu celiya. Maacuunta, kuwa dhoobada ka sameeysan iyo kuwa kale ee quraarada ka samaysan, laakinse ka reeban baakooyinka quraarada ka samaysan, waxaa lagu quba goobta loogu talagalay khashinka culus iyo kan aqalka [grov- eller hushållsavfall]. Nalalka nooc kasta ha ahaade, waa in lagu qubin goobta quraaradaha loogu talagalay. Khasinka noocaas ah waxaa caadi ahaan lagu quba goobaha dib-u-warshadaynta ee degmada, Warbixin faahfaahsan kala xiriir maamulka degmada.

XAANSHIDA-WARGEYSYADA

Tusaale: Xaanshida-wargeysyada maalinleha ah iyo kuwa toddobaadyada soo baxa, kuwa xilliyada soo baxa, kuwa lambarrada taleefanada iwm ku qoran, kuwa xayeeysiinta, kuwa warbixinta, kuwa wax lagu qoro ama lagu masawiro.

Sidatan yeel: Intii xaanshida-wargeysyada aadan ku tuurin weelka, waa inaad bacyada ka bixisa, oona xanshiyadaha xayeeysiinta ku dhegan ka fiiqda.
Fiirogaar ah: Baqshadaha waxaa la dhex dhiga khashinka aqalka (ama qaybta la gubiyo karo, haddii kuwaasoo kale ay jiraan).